## Ku wajahan Qorshe Hawleed Qaran ee La Dagaalanka Midabtakoorka Ireland La-tashiga Dadweynaha 2021

### Hordhac

**Guddiga La Dagaalanka Midabtakoorka iyo Warbixinta Ku Meel Gaarka ah**
Guddiga La-dagaalanka Midabtakoorka (National Anti-Racism Committee) waa guddi madaxbanaan oo ey dawladu aasaastey 2020 si loo sameeyo qorshe hawleed qaran oo ka dhan ah cunsuriyada Ireland. Waxaad halkan.ka arki kartaa xubbinimadayada iyo Shuruudaha Tixraaca oo buuxa

Iyadoo la raacayo Shuruudaheena Tixraaca, waxaan warbixinteena **ku meel gaarka** ah u gudbiney Wasiirka Caruurta, Sinnaanta, Naafada, Isdhexgalka iyo Dhalinta (Minister for Children, Equality, Disability, Integration and Youth) markay ahayd Nofeembar 2020. Warbixintu waxay daaha ka rugeydaa fikradaheena iyo qorshayaasheena aasaasiga ah ee lagu kobcinaayo Qorshe Hawleedka Qaran ee looga soo horjeedo Midabtakoorka. Waxaad Warbixinta Ku Meel Gaarka ah ka heli kartaa halkan.

La tashiga ururada qeybta ka ah iyo xubnaha bulshada waa qeyb muhiim u ah shaqadayada. La tashigani wuxuu qofwalbo siiyaa fursad uu ku yeesho fikirkiisa ku aadan sida aan wax-ku-oolnimada ugaga hortagi karno dhamaan noocyada midabtakoorka ee manta ka jira Ireland.

Waxaan dukumintigan wada-tashiga u diyaariney si aan u sharaxno waxa ku saabsan wada-tashiga iyo inaan ifino goobaha qaar oo aan si gaar ah usoo dhaweyneyno in fakar iyo soojeedinba laga yeesho.

**Aragtidaadu waxay muhiim u tahay naga waawinta qaabab wax-kuool ah ee looga hortago midabtakoorka Ireland.**

**Waa maxay midabtakoor?**
Warbixinteena ku meel gaarka ah waxaan midabtakoorka ku qeexney fahamka soo socda si shaqadeena u hago:

> *[midabtakoorku waa]…dhaqdhaqaaqyada awoodeed oo laga helo unugyada machadyada iyo ha'aydaha, dhaqamada, sharciyaasha dhaqan iyo kuwo siyaasad, kuwaas oo leh saameeynta saarista ama kala sooca shakhsiyaada ama koox, iyadoo lagu salaynaayo aqoonsigooda, sida lagu sharaxey Maqaal 1 ee Is-afgaradka Caalamiga ah ee Iribtirka Midab Kala Sooca(ICERD), kaas oo bixiya:*
>
> *'…ereyga "Midab Kala sooca" waxuu la micno noqon doonaa kala duwin nooc walba, hayndaabyo ama doorbiditaan ku salaysan midab, nooc, abtir, ama qowmiyada ama qaranka kasoo jeedid taas oo leh ujeedka ama saameeynta*

> *burinta ama naafeynta aqoonsi, raaxeysiga ama jimicsiga, ee ago isku wada mida, ee xuquuqda aadamiga ah iyo xurriyadaha aasaasiga ah ee siyaasada, dhaqaalaha, dhaqanka iyo qeyb walbo oo kamida nolosha dadwaynaha. '[1]'*

Waxaan garowsannahay isgoyska u dhaxeeya midabtakoorka iyo noocyada kale ee dulmi oo lagu saleeyo jinsiyad, dareen-galmo, aqoonsiga jinsiyadeed, naafanimada iyo duruufaha dhaqaale-bulsheed – iyo in haweenka, caruurta iyo raguba ey la kulmaan xeerar kala duduwan ee midabtakoor.

Fahamka aan la qabsaney waa mid nool, ku dhisan afkaarta shuruucda caalamiga ah iyo sidookale charciyada EU iyo Irish.

Midabtakoorku waa dhibaato nidaami ah taas oo ka muuqaneysa goobo badan ee bulshada dhexdeeda ah eyna saameyneyso dhinacyo badan ee nolosha dadka. Midabtakoorku wuxuu ku dhex jiraa dhismooyinka; kasoo dhalaalaa uuna kasoo muuqdaa machadyada, dhaqamada iyo shuruuc dhaqameedyada; tabahaas dhexdooda wuxuu ku leeyahay saameeynta saarista ama kala sooca shakhsiyaad ama kooxyo, iyadoo lagu salaynaayo midabkooda ama qowmiyadooda (ey kamid tahay jinsiyada iyo xubin ka ahaansho bulshada Safarta ah)

**Midabtakoorku waa xaqiiq ka jirta Ireland. Waxaan u baahanahay Qorshe Hawleed Qaran oo Dhamestiran oo wax-ku-ool ah si aan u joojino.**

Midabtakoorku waa xaqiiq ka jirta Ireland. Caddeymo qoran oo socda ayaa muujinaya in uu ku dhex jiro xeer walba ee bulshada ah waxaana dareema kooxyo badan oo kala duduwan. Midabtakoorku waxaa sii ifbixiyey COVID – saameynta duwan ee uu ka hayo soo-galootiyada iyo kooxaha kale ee bar tilmaameedka u ah kala sooca midabka.

Aqbalitaanka culeyska cadeynta sannadihii u dambeeyey ee ah in midabtakoorku uu jiro, waxaan garowsanney iney qasab tahay inaan dhaqaaqno oo aan tallaabo qaadno. Tan iyo Qorshe Hawleedkii Qaran ee looga soo horjeedey midabtakoorka uu dhamaadey 2008. Ururada bulshada rayidka waxey raadinayeen diirad qaran oo la cusbooneysiiyo, talo taas oo sidookale Guddiga UN-ka uu ku soo celiyey dulmarkii u dambeeyey ee Ireland ee loogu tala galay Iribtirka Midab Kala sooca (CERD) ee 2019. Guddiga Sinnaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Irish (The Irish Human Rights and Equality Commission) ayaa sidookale ku baaqey horumarinta Qorshe Hawleed cusub.
Kala sooca midabka ayaa haddeertan si sharci ah looga mamnuucey Ireland hadalada midab naceybkuna sidookale waa sharci darro. Dhamaan qeybaha bulshada waxaa saaran waajib ah iney qaadaan tallaabo firfircoon si ey u iribtiraan kala sooc (oo ey kamid tahay dhinacyada midabka) intey ku jiraan shaqadooda. Horumarinta sinnaanta iyo is-dhexgalka

[1] Anti-Racism Committee Interim Report, 2020, 3.

qowmiyadaha laga tira badanyahay waa ujeedo la hadal qaadey in looga dhaqmo nidaamyada dawliga ah ee faraha badan iyo kan siyaasada bulshaduba. Tallaabooyinka lagula dagaalamo midabtakoorka waxaa lagu daray Xeelada Is-dhexgalka ee Soogalootiga iyo Socodaale Qaran iyo Xeelada Is-dhexgal ee Roma. Dib U habayn fara badan oo haddeertan socota ayaa muhiim u noqon doona xoojinta difaaca sharciyeed ee dadka oo looga soo horjeedo midabtakoorka. Waxaa kuwaani kamida hindiso sharciyeed ee dambiga naceybka ah iyo maamulitaanka mediyaha onlineka ah. Dib u habaynta noocaan aha waxay baaq xoogan ka bixineysaa in bulshada Irish eysan u dulqaadan doonin in kuwa laga tira badanyahay aanu marin madabtakoor nooc walba ah.

Hase yeeshee, midabtakoor iyo midab kala sooc ayaa ka jira Ireland inkastoo mamnuucyo shaci ahi ey jiraan. Qodobada iyo hindisaha siyaasadeed ee hadda jira kuma filna waxaana aalaaba taagan daldalooyo muuqda. Qorshe Hawleedka Qaran wuxuu bixinayaa nooc loo maareynayo tallaabooyinka iyo shuruucda jirta qaab sidan ka balaaran oo ficilo adag ah si loo horumariyo wax-ku-oolnimadooda. Waxay sidookale keeneysa ficilo iyo hindiso cusub si wax looga qabto cabashooyinka taagan iyo kuwa soo koraya. Horumarinta ficiladan iyo hindisiyahan cusub, waxaan ka war hayn doonaa xaqiiqda ah in midabtakoorku uu iskgoys la leeyahay sinnaan la’aanaha iyo kala soocyada kale ee kajira goobaha kale, tusaale ahaan jinsiga iyo naafanimada.

## Haysashada xog tayo fiican leh waxey muhiim u tahay joojinta midabtakoorka

La socoshada sinnaanta ku salaysan qowmiyada ayaa ah furo muhiim u ah daah ka rugista midab kala sooca baahay iyo saameynta ku leedahay nolosha. Waxay muhiim utahay horumarinta tallaabooyinka falcelineed ee wax ku-oolka ah. Dib u eegista Xuquuqda Aadanaha ayaa is ku celeclis ah ugu baaqdey Ireland iney la qabsato waddo joogto ah ee ururinta xog qowmiyado kala duduwan ah ee bixiyaasha bulshada iyo kuwa kale. Warbixinteena Ku Meel gaarka ah waxay midan u aqoonsataa talo mudnaan leh. Qorshe Hawleedka Qaranka ayaa sii dulmaraya daldaloolyadan ah ururinta iyo isticmaalka xogta, wuxuuna tixgaliyaa nooca isbeddelo ee naga caawin kara isticmaal fiican ee xogta oo lagula dagaalamayo midabtakoorka.

**Ku wajahan Qorshe Hawleed Qaran ee La Dagaalanka Midabtakoorka Ireland**

Waa muhiim in Qorshuhu lagu beero ka go’onaansho qayimka xuquuqda aadanaha ah, dimuqraadi iyo xeerka sharciga. Asbaabahan waa iney muujiyaan qaab eyna wargeliyaan ficilada bulshada Irish ee lagula dagaalamayo midabtakoorka.

Sida lagu sheegeyba Warbixinteena Ku Meel Gaarka ah, shaqadeena waxaa xaga dhaqamada ugu fiican iyo waxa ku jira Qorshiyaasha Hawleed ee Qaranka oo looga soo Horjeedo Midabtakoorka sida lagu cadeeyeyba Hagaha Muuqda ee lagu Kobcinayo Qorshayaasha Howleed ee Qaranka oo looga soo Horjeedo Midab Kala Sooca oo soo daabacey Xafiiska Qaramada Midoobey U Qaabilsan Xuquuqda Aadanaha.

Shaqadeyadu waxaa sidookale soo wargaliyey [Qorsho Hawleedka EU ee looga soo Horjeedo Midabtakoorka (2020-25)](), taas oo iyada lafteeda turjumeysa hagaha UN-ka

Iyadoo la isticmaalayo Hagaha UN-ka, waxaan rajeyneynaa inaan soo saarno Qorshe Hawleed looga soo Horjeedo Midabtakoor kaas oo ah

- *Ku salaysan xeerarka xuquuqda aadanaha*
- *Dhamestiran baaxad ah*
- *Xeer qaran loo hawlgalinayo*
- *Ujeedo ficil leh*
- *Dukuminti dadweyne ah*
- *Hawl soconeyso ah*
- *Isku keena dhinacyada caalamig.*[2]

## Xaaladan, waxaan ubaanahay inaan aragtidaada maqalno

Iyadoo lagu dhisayo fahamka midabtakoork iyo qeybaha cabasho ee lagu soo xusey Warbixinteena Ku Meel Gaarka ah, macaluumaakda ka yimaada wada-tashigan, Qorshe Hawleedka Qaran waxaa ku jiri doona ficilo loo soo jeediyo dhamaan waaxyada iyo hay'adaha dawlada, madaxda, machadyada iyo ururada – qeybaha dad weyanah, meelaha gaarka ah iyo kuwa is-xilqaameyba – kuwaas oo leh awood iyo mas'uuliyadba iney wax ka qabtaan midabtakoorka ama kuwa ku lug lahaanshadooda ey muhiim tahay. Qorshe Hawleedka Qaranka wuxuu sidookale diirada saari doonaa warbaahinta, kuwa cusub iyo kuwii horeba. Wuxuu keydin doonaa ficilo lagu horumarinayo xuquuqda iyo sinnaanta dhamaan kuwa ku nool Ireland.

Si ey nooga caawiso isku daba-rudka wada-tashigayaga, waxaan soo jeediney dhawr mowduucyo kuwaas oo ka turjuma arrimaha lagu soo qaadey warbixinteena ku meel gaarka ah. Fadlan ogoow inaanan u dooran mowduucyadan ineytahay sababta iney yihiin meelaha kaliya ee cunsurinimada ka dhacdo, ama iney mowduucyadan kaliya yihiin kuwa la rabo in wax lagaga qabto Qorshe Hawleedka Qaranka. Waxaa kaliya loo doorbidey iney kiciyaan wadahadalka eyna gacan ka geystaan isku-daba-rudka wada-tashiga. Waxaan sidookale aad u sugeynaa inaan maqalno aragtidiina ku aadan arrin walba oo kale oo aad dareentid iney lagu hormarin karo Qorshaha.

Waxaan bixiney dhowr su'aal ee mawduuc walba ku aadan si ey nooga caawiso in wadahadalka uu kaco. Waxaad arki kartaa su'aalo ka hooseeya heerka waxtarnimo si ay kaaga dhisaan xogta aad ku biiriso wada-tashiga. Laakiin fadlan xurriyad dareen inaad aragtidaada dhiibatid ee ku aadan arrimahan adigoon tixiraaceynin su'aalaha, iyo/ama inaad bixisid aragtidaada ku aadan arrimo kale ee aan lagu sheegin dukumintigan. Waxaan sidookale garowsannahay in soo noqonoqosho badan ee u dhaxeysa mowduucyadan jiri karto.

[2] *Developing National Action Plans Against Racial Discrimination: A Practical Guide*, UN OHCR 2014, 3.

**Mowduuc 1:** **Helitaanka Caddaalada**
**Mowduuc 2:** **Dhamaan noocyada Warbaahinta iyo Is-gaarsiinta, ey ku jiraan tiknoolajiyada cusub**
**Mowduuc 3:** **Shaqo, Waxbarasho, Caafimaad, iyo Qaabilitaan**
**Mowduuc 4:** **Is-dhexgal iyo ka qeybqaadasho**

## 1. Helitaanka Caddaalada

Mowduucani waxaa ku jira joojinta kala sooca iyadoo la isticmaalayo madaxda fulinta sharicga, ey kamid tahay arrimaha qaababka cabashada, soo gudbin hoose iyo noocyad gaboodfalka.

- Waa maxey taageerada aad jeclaan lahayd in la siiyo dhibaniyaasha midabtakoorka?
- Waa maxay ficilada wax ku-oolka u ahaan lahaa saarista caqabadaha caddaalada loogu fidiyo dhibaniyaasha midabtakoorka?
- Waa maxey ficilada lala qabsan lahaa si loo joojiyo midabtakoorka iyadoo la isticmalayo sharic fulinta?
- Ma u maleysaa in midabtakoorku saameeyo dadka lasoo xirey ama lasoo eedeeyey ee nidaamka caddaalada dambiilaha, haddey saas tahay, sidee baa wax looga qaban karaa?
- Ma u malaysaa in midabtakoorku saameeyo dadka la xukumey ama la maxbuusey ee nidaamka caddaalada dambiilaha, haddey saas tahay, sidee baan wax looga qaban karaa?
- Ma u malaysaa in midabtakoorku saameeyo garsoorka sharciga ah iyo maxkamadaha, haddey saas tahay, waa maxey ficilada ubaahan in la qaado?
- Miyaa jira arrimo gaar ah ee lala xiriiriyo midabtakoor iyo jinsi iyo helitaanka caddaalada?

## 2. Dhamaan noocyada Warbaahinta iyo Is-gaarsiinta, ey ku jiraan tiknoolajiyada cusub

Waxaa midan kamida warbaahintii hore iyo kuwa la daabaco iyo kuwa la baahiyo, iyo sidookale baraha bulshada iyo tiknoolajiyadaha cusub.

- Waa maxey ficilada aad soo jeedin lahayd oo lagu joojinaayo midabtakoorka ee noocyada warbaahineed kuwooda cusub iyo kuwii horeba?
- Waa maxey ficilada aad umaleysid iney caawinayaan iney warbaahinta iyo saxaafada ka dhigaan kuwo intan kasii metelaad siiya xeerarka qofwalbo oo ku nool Ireland?

- Waa maxey caqabadaha ey soo rugtey tiknoolajiyada cusub marka loo eego midabtakoorka?
- Miyaa jira fursado ey bixiyaan tiknoolajiyadaha cusub ee lagu xoojiyo la dagaalanka midabtakoorka?
- Waa maxey ficilada eytahay iney qaadaan shirkadaha tiknoolajiyadaha si ey ula dagaalamaan midabtakoorka?
- Waa maxey doorka ey shirkada tiknoolajiyadaha ka ciyaari karaan maareynta la dagaalanka midabtakoorka?

### 3. Shaqo, Waxbarasho, Caafimaad, iyo Qaabilitaan

Kuwani waa goobo muhiim u ah nolosha dhaqaalaha iyo bulshada halkaas oo loogu baahanyahay tallaabooyin lagu taageeraayo is-dhexgal buuxa iyo ka qeybqaadasho kooxaha lagu hayo midabtakoorka ee bulshada iyo dhaqaalaha. Waxaa midan kamida joojinta midabtakoorka goobta shaqada; xaqiijinta in adeegyada bulshada loo naqshadeeyo loona bixiyo is-dhexgal dhami ah; iyo tallaabooyin wax lagaga qabanayo sinnaan la'aanta helitaanka, ka qeybgalka iyo natiijooyinka waxbarasho, caafimaad iyo adeegyada qaabiltaanka.

- Sidee baad u jeclaan lahayd in lagu joojiyo midabtakoorka waaxda waxbarashada?
- Sidee baan u xaqiijin karnaa sinnaan dhamaan caruurta ah marka loo eego helitaanka adeegyada?
- Waa maxey ficilada aad jeclaan lahayd in aad aragto in la qaado waaxda caafimaadka dhexdeeda si wax looga qabto sinnaan la'aanta ku salaysan qowmiyada?
- Waa maxey tallaabooyinka kaabi lahaa wax ka qabashada midabtakoorka helitaanka qaabilitaanka?
- Waa maxey hindisyaha iyo ficilada aad jeclaan lahayd inaad aragto in la qaado si loola dagaalamo midabtakoorka ku aadan helitaanka shaqo?
- Miyaa jira waaxyo gaar ah ee awooda shaqaalaha taas oo aad u baahnaan lahayd in ficil loo baahanyahay in mudnaan la siiyo si loola dagaalamo midabtakoorka?
- Waa maxey tababarka iyo taageerada dheeraadka ah oo kaabi lahaa la dagaalanka midabtakoorka goobta shaqada?
- Waa maxey tallaabooyinka lasoo rugi lahaa si loo horumariyo is-dhexgalka suuqa shaqada iyo shaqaalaha, iyo sidookale wax ka qabashada sababaha ku hoos duugan kala sooca?

## 4. Is-dhexgal iyo ka qeybqaadasho

Mowduucan waxaa kamida doorka ey waxbarasahda iyo wacyi-gelinta ka ciyaar karaan dhamaan xeerarka la dagaalanka fikradaha iyo dhaqanka cunsurnimada. Waxaa midani kamid noqon kara tallaabooyinka lagu horumarinaayo waxbarista ku aadan kala duwanaanshaha iyo kala sooca manhajka rasmiga ah, dib u qaabeynta taariikha si loogu daro kooxaha iyo dhinacyada haddeertan la inkirey, iyo sidookale hindisiyo wacyi gelin bulsho.

Waxaan sidookale mowduucan dhexdii ka raadin doonaa sida wax looga qabto caqabadaha ka haysata dadka ka soo jeeda kuwa laga tirada badanyahay ka qeybtalka siyaasada dimuqraadiga iyo istaagida doorashooyinka maxaliga iyo kuwa qaranka.
Waxaan sidookale fiirin doonaa xuquuqda helitaan ee adeeg ama goob walbo oo loo asteeyey iney dadweynaha isticmaalaan, sida gaadiidka, hudheelada, baararka, mehradaha, tiyaatadaha, xarumaha ciyaaraha, darjiimooyinka iyo agabyada damaashaadka.

- Waa maxey hindisyada aad umaleysid iney sare uqaadaan wacyi gelinta bulshada ee kala sooca midabka eyna caawiso la dagaalanka fakarka cunsurnimada?
- Sidee baan u saari karnaa caqabadaha wajahaya is-dhexgalka bulsho iyo ka qey qaadashada ee dadka sida gaabiska ah loo metalo iyo kooxaha la dulmiyey?
- Sidee baan u xaqiijin karnaa in kuwa sida ugu daran loo inkirey aan si khaas ah ugu soo darno?
- Waa maxey hindisyaha caawin lahaa in la xaqiijiyo in siyaasada bulshadu ey ka war hayso nidaamyada midabtakooreedka ee ey la kulmaan bulshooyinka la midabtakoorey?
- Waa maxey ficilada aad soo jeedin lahayd si loo kordhiyo tirada dadka kasoo jeeda kooxaha laga tirada badanyahay ka qeyb galka iyo u istaagida doorashooyinka maxaliga iyo kuwa qarankuba?
- Waa maxey ficilada loo baahanyahay si loo xaqiijiyo in habraacyada siyaasada, qaababka iyo ka qeyb qaadashada ey yihiin kuwo aan cunsurnimo ku jirin?
- Waa maxey ficilada loo baahanyahay in la qaado si wax looga qabto midabtakoorka isbootiska? Waa maxey ficilada togan ee midan horumarin kara?
- Waa maxey ficilada loo baahanyahay si loo abuuro wacyi gelin oona wax looga qabto midabtakoorka farshaxanka iyo dhaqanka? Waa maxey ficilada togan ee midan horumarin kara?
- Waa maxey ficilada loo baahanyahay in la qaado si loo horumariyo is-dhexgalka dhaqanka iyo ka qeybqaadashada bulshada?

Waan kuugu soo dhaweeneynaa inaad na siiso aragtiyaaga ku aadan wax walbo oo aad uamalso iney ku haboonyihiin Qorshe Howleed Qaran ee lagaga Hortago Midabtakoorka Ireland. Su'aalaha guud ee hoos ku qoran ayaa laga yaabaa iney ku caawiyaan.

**Su'aalaha guud**

- Maxaad u aragtaa dhibaatooyinka ugu badan ee ey wajahaan dadka laga tirada badanyahay?
- Waa maxey hindisyaha aad umaleysid iney wax ka qaban lahaayeen daldaloolyada ururinta iyo isticmaalka xogta?
- Sidee baad ku cabiri lahayd sida wanaagsan ee uu qorshahan u shaqeynayo? Maxaa umalaysaa in loo baahanyahay in lagu daro ficilada dardargelinta iyo kormeerka lagu taliyey ee qorshahan?
- Garowsiga in Qorshe Howleedkan wax badan dabooli doono, waa maxey labada goobood ee u malaysid in mudnaanta la siiyo ficil degdeg ah dartii?
- Waa maxey waxa kala duwanaanshaha ugu wayn keeni kara mudada fog?
- La kulanka midabtakoornimada miyey isku bedeshaa iyadoo ey ku xirantahay qofka jinsiyadiisa, da'ada, nooca dareen-galmo ama qoyis ama xaalad rayidnimo?
- Sidee buu la kulanka midabtakoornimada ula xiriirta naafanimada?

**Ireland waxay sameeneysaa Qorshe Hawleed lagaga soo Horjeedo Midabtakoorka. Aragtidaadu waxey caawineysaa qaabeynta Qorshan. Waad ku mahadsantahay ka mid ahaanshaha shaqadan muhiimka ah.**